



Isku mid ahaanshaha: MODERNA iyo PFIZER

MODERNA

PFIZER

**NOOCA
TALLAALKA**

mRNA

mRNA

**WAX KU
OOLNIMADA
TALLAALKA
LABAAD**

94.1%

95%

**WAXYEELLOOYI
N CAADI AH OO
LA FILAYO**

- Xanuun yar oo laga dareemo goobta la duray
- Madax xanuun
- Daal
- Xanuun murqo ama laabatooyinka
- Qandho ama qadhqadhyo

- Xanuun yar oo laga dareemo goobta la duray
- Madax xanuun
- Daal
- Xanuun murqo ama laabatooyinka
- Qandho ama qadhqadhyo



Ma jiraan farqi u dhexeeya tallaalada COVID-19 ee Moderna iyo Pfizer?

Maya. Dhammaan tallaallada COVID-19 ee hadda la ansixiyay waa kuwo ammaan ah oo wax ku ool u leh xagga yareynta halista jirrooyinka daran, isbitaal dhigid iyo geerida. Waxay gacan ka geysan doonaan xakamaynta faaftaanka COVID-19 ee bulshada dhexdeeda.

Nooca tallaalka

Labadooduba waxay ku saleysan yihiin tallaalada mRNA. Tani waa hab loo abuurto difaac dhanka kuwa hela taxane dhammaystiran oo leh laba tallaal oo COVID-19 ah. Cilmi baarayaashu waxay dersayeen oo ay la shaqeynayeen xagga tallaalada mRNA muddo tobanaan sano ah.

Wax ku oolnimada

- Tallaalka Moderna wuxuu waxtar u leeyahay **94.1%** xagga ka-hortagga cudurrada halista ah, isbitaal dhigidda iyo dhimashada.
- Tallaalka Pfizer wuxuu **95%** waxtar u leeyahay xagga ka-hortagga cudurrada halista ah, isbitaal dhigidda iyo dhimashada.

Sababtoo ah Pfizer iyo Moderna si isku mid ah ayaa loo sameeyaa, tallaalna KAMA fiicna kan kale. Tallaalka ugu fiican ee aad qaadan karto waa kan ugu horreeya ee aad heli karto.

Dhibaatooyinka ee yeelan karaan

Labada tallaalba waxay yeelan karaan waxyeelo la fisho/laga filayo oo khafiif ah oo ee ka yihiin isku mid. Waxba kuma jabna kan aad hesho. waxaad yeelan kartaa:

- Xanuun goobta la duray
- Madax xanuun
- Daal
- Xanuun murqo ama kalagoys
- Qandho ama qadhqadhyo

Wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan tallaaladan COVID-19, booqo OttawaPublicHealth.ca/COVID19Vaccine